SOLIDARITY NOW
This is our common ground

# HAGAA XISAABAADKA

## 1 WAA MAXAY CADEYNTA CANSHUURTA?

Waa caddeyn si elektaroonik ah looga gudbiyo bogga Hay'adda Madaxa-bannaan ee Dakhliga Dadweynaha (AADE - www.aade.gr). Kuwa waajibka ku ah inay soo gudbiyaan (eeg qodobka 2 hoose) waxay sannad kasta ku soo sheegaan dakhliga iyo hantida ay heleen ama haysteen sannadkii canshuureed ee hore. Habkan waxaa loo adeegsadaa in lagu xisaabiyo qadarka canshuurta uu qof walba ku leeyahay, iyadoo lagu saleynayo dakhliga iyo hantidiisa (sida gaadiid, guryo iwm).

## 2 WAA KUMA KUWA WAAJIBKA KU AH INAY SOO GUDBIYAAN CADDEYNTA CANSHUURTA?

Caddeynta canshuurta waa in uu soo gudbiyaa qof kasta oo deggan Giriigga, gaaray da'da 18 sano, kuna sugnaa Giriigga sannadkii canshuureed ee hore (Janaayo ilaa Diseembar). Sidoo kale waa muhiim in la xuso in kuwa aan lahayn dakhli ama hoy joogto ah ay sidoo kale waajib ku tahay inay soo gudbiyaan caddeynta canshuurta.

## 3 MAXAA SABAB U AH IN AAN SOO GUDBINNO CADDEYNTA CANSHUURTA?

Marka hore, sababtoo ah waa waajib. Intaa waxaa dheer, gudbinta caddeynta canshuurta waxay ka caawisaa in la caddeeyo in qofku deggan yahay Giriigga sannadka la gudbinayo. Ugu dambayn, gudbinta caddeynta canshuurta waxay fududeysaa habraacyo kale sida furitaanka akoon bangi, codsashada gunnooyin, la macaamilka adeegyada dadweynaha, iyo helitaanka xuquuq iyo barnaamijyo kala duwan.

## 4 WAA GOORAYNTA UGUXIDHIDA SOO GUDBINTA CADDEYNTA CANSHUURTA?

Soo gudbinta caddeynta canshuurta badanaa waxaa lagu sameeyaa inta u dhexeysa Abriil iyo dhammaadka Juun.

## 5 MAXAA DHACAYA HADDAY AANAD SOO GUDBIN CADDEYNTA CANSHUURTA SANNAD AMA HADDAYAAD KU SOO GUDBISO KA DIB GOORDA UGUXIDHIDA?

Labada xaaladoodba waxaa lagugu ganaaxi doonaa 100€. Sidoo kale waxaa dhici karta inaadan xaq u yeelan codsashada gunno.

## 6 MAXAA AAN U BAAHANAHAY IN AAN HAYSTO SI AAN U SOO GUDBIYO CADDEYNTA CANSHUURTA?

Waxaad u baahan doontaa koodhadhka TAXISnet, Lambarka Aqoonsiga Canshuurta (AFM), lambarka caymiska bulshada (AMKA ama PAYPAA) iyo xogta shaqsiga ah ee qof kasta oo ku tiirsan (carruurta iyo xaas/xaaska).

## 7 WAA MAXAY KOODHADHKA TAXISNET?

Kuwani waa koodhadh gaar ah oo shaqshiyeed oo ka kooban magac isticmaale (username) iyo eray-sir (password), waxaana loo isticmala gelitaanka nidaamyada kala duwan ee dawlda ee qab internet ah, si aad u hesho koodhadhka TAXISNET, waxaad u bahantahay in aad heysata aqoonsiga canshuurta ah (AFM), lambar taleefan, iyo ciwaan imayl (email) oo firfircoon (shaqeynayo ama aad isticmasho marwalba). Aad bay muhiim u tahay in aadan lumin koodhkaga TAXISNET oo aadan weligaa la wadagin cid kle, maadama ay ka kooban yihiin macluumad si gaar ah u khaas ah.

SOLIDARITY NOW
This is our common ground

## 8 WAA MAXAY AFM?

AFM (lambarka aqoonsiga canshuurta) waa lambar gaar ay bixiyan hay'adda canshuurta ee GARIIGA qofkasto ay da'diisu tahay 18 sano ama ka weyn oo ku nool dalka GARIIGA. Waxaa loo isticmaala in lagu diwaangeliyo dhamaan dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed, caymis iyo xisaabeed. AFM-ga waxa loo texgeliyaa mid ka mid ah aqoonsiyada shaqsiyeed ee ugu muhiimsan, maadama looga baahan yahay helitanka ku dhowaad dhamman adeegyada dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leyahay.


## 9 HALKEE AYAAN TAGA SI AAN U GUDBIYO CADEYNTA CANSHUURTA (TAXI DECLARATION)?

Waxad heysta labo ikhtiyaar, kan koobad waa ina boqata xisaabiye gaar ah (private accountant), halkaas oo ad ka bixin doonto khidmad adeeg(badana qiyas euro30). Ikhtiyarka labaad waad inaad tagto urur aan dawladed aheyn (NGO) oo leh xisaabiye. Xaladdan, dhamaan adeegyada waxaa si bilaash ah looga bixiya ka-fa'iideystayasha.

## 10 NATIIJADA KA DIB GUDNINTA CADEYNTA CANSHUURTA

Kadib markaad gudbiso cadeynta canshuurta , waxaad heli dontaa ogeysiis qiimeyn canshuureed oo ka socda (AADE), kaas muujinayo natiijada xisaabinta canshuurtada.
Waxaa jiro saddex natiijo oo suurto gal ah eber, la bixinayo,ama lasoocelinayo
Eber: uma baahnid inaad bixiso wax canshuur ah.
La bixinayo: waa inaad bixisaa canshuur. Bixinta canshuurta lagu sameeyaa 8 qeybood oo isle'eg, ama si toos ah bangiga adigoo soo bandhigaya cadeynta canshuurtada, ama adigoo adeegsanaya e- banking.
La so celinayo: waaxa xaq u ledahay in lagu soo celiyo canshur ( si aad u hesho, waa inaad ledahay akoon bank diwangashan o oleh IBAN.

## 11 MAXAA AY TAHAY INAAD FIIRO GAAR U YELATO INTA LAGU JIRO SANNADKA AAD SHAQAYNEYSO?



Shaqale kasta sannadka uu shaqeyo, waa inuu ku bixiyo 30% dakhliga uu helo isaga isticmalaya karkiisa bangiga, si uu ugu fogaado bixinta ganaax.

## 12 ISBEDDELKA XOGTA SHAQSIGA

Haddii ciwaankaaga ama lambarka aqoonsigaaga isbeddelo, waa inaad ogeysiisaa xafiska canshuuraha, gaar ahaan xafiiska mas'uulka ka ah aagga aad degantahay. Waxa si elektroonik ah ugu cusboonaysiin kartaa ciwaankaaga guriga adigoo adeegsanaya nidamka TAXISnet. Si kastabo ha ahatee , haddii lambarka aqoonsigaga is bedelo, wa inaad si shaqsi ah ugu wargelisaa xafiiska canshuuraha ee degaankaaga.

Macluumaad dheerad ah ama haddii aad u bahantahay caawimaaddheeri ah fadlan haka labalabayninaad nala so xariirto!

Athens Solidarity Center
2 Domokou str., Athens
Tel. +30 210 82 20883
athens@solidaritynow.org

Thessaloniki Solidarity Center
25D I.Koletti str., Thessaloniki
Tel. +30 2310 555263-4-6
thebluecenter@solidaritynow.org